

LACAG DIRID

Halka sheey oo kaliya oo aadan ku sameysan karin bangi akoonka keydka loogu tala galay waxaa waaye in aad lacag u diri karin qof kale ama hey'ad, marka biilkaga kama dhuubi kartid bangiga akoonka keydka. Laakiin waxaad sameyn kartaa lacag waad u kala diri kartaa bangi akoonka keydka iyo bangi akoonka caadiga oo jeega loo isticmaalo (checking account).

AMNIGA BAGIGA GUDIHIISA



Lacagta aad bangiga dhigatey waxaa kafaala qaaday Federal Deposit Insurance Corporation (FDIC), waa wakaalad ka madax banaan dowlada U.S. Difaaca aawgeed, waxaa la ilaalinayaa ilaa iyo heerka ugu sareeya oo uu kongareeska (golaha ummada) ogo-laadey, hataa hadii uu bangigaaga ama wakaalada lacagta ay qasaaran. Bangiyada aad ku leedahay akoonka way ku kala duwan yihiin sharciyadooda difaaca.

Akoonka halka qof kaliya leeyahay

Lacagtaada oo dhan oo aad dhigatey akoonka caadiga oo jeega loo isticmaalo (checking account) iyo akoonka keyda, oo magacaaga oo kaliya ku qoran yahay, waxuu kugu jiraa ceymis lacagta cadi-geeda gareeysa ilaa iyo \$250,000.

Akoonka labada qof wada leeyihiin

Waxa lacag ah oo aad wada leedihiin labadiina oo gabi ahaan ku jira akoonka bangigina, lacagta maalin galinta sida: raasumaalka (stocks), warqada cadeyneysa maal galintaada (bonds) iyo maal ga-linta lagu sameeyey labadoodaba, ma aha mid ceymis laga jirta FDIC.

SAACADAHA

FARGO PUBLIC LIBRARY

102 3rd St. N. • Fargo
(701) 241.1472

Isniin – Khamiis 9-9
Jimco 11-6
Sabti 9-6
Axad 1-6

*Mabaqada (Library) weyn wuu xiran yahay
Khamiista laga bilaabi Memorial Day ilaa
iyo Labor Day.

DR. JAMES CARLSON LIBRARY

2801 32nd Ave. S. • Fargo
(701) 476.4040

Isniin – Khamiis 10-8
Jimco 11-6
Sabti 9-6
Axad 1-6

* Dr. James Carlson Library wuu xiran ya-
hay Khamiista laga bilaabi Memorial Day
ilaa iyo Labor Day.

NORTHPORT BRANCH

2714 N. Broadway • Fargo
(701) 476.4026

Isniin – Khamiis 10-8
Jimco 11-6
Sabti 9-6
Axad Xiran yahay

WWW.FARGOLIBRARY.ORG



CAQLIGA LACAGTA



**KU BILOOW SI CAQLI LEH:
SIDA BANGIGA LOO
ISTICMAALO CAADI AHAAN**




MAXUU SAMEYAA BANGIGA

Dad aad u tiro badan, bangiga iyo wakaalada lacagta waxuu u yahay xafiiska ugu horeyey oo ay kula ma-caamiiloodan xisaaboodkooda oo aayna aad u isticmaalaa. Taas daraadeed ayaa keyneysa in bagiga ama wakaalada lacagta uu dadka siiyo jid fiican oo amni leh oo ay ku dhiibaan biilkooda iyo ay dhigtaan keydkooda.

Labada wax oo ugu weyn uu bangiga bixiyo waxaa waaye: bangi akoonka caadi loo isticmaalo (checking account), kaas oo kuu ogolaanaya in aad lacag jeeg ahaan ama elektaroonig ahaan aad qof kale ama wakaalad kale ugu dirto, akoonka keydka, kaas oo laguugu siinayo lacag ribo ah, lacagaha kuu yaalo bangigan.

Bangiyada badankooda waxaad lacagta ku diri kartaa elektaroonig ahaan adigoo ka diraaayo bangi akoonnaga caadiga ah una diraaayo akoonka keydka, ama adoo ka diraaayo akoonka keydka una diraaayo kan caadiga ah.

AKOONKA CAADIGA OO JEEGA LOO ISTICMAALO (CHECKING ACCOUNT)



Akoonka caadiga oo jeega loo isticmaalo (checking account) waxuu kuu ogolyahay dhowr arimo oo kala duwan, oo dhinaca dhaqaalaha ah, taas oo aad dhib u ahaan laheed caadi ahaan. Waxaad qori kartaa warqada jeega ah, adoo cadeynaya halaha aad dhiibeyso iyo qofka aad u direyso. Ama adoo akoonka internetka isticmaalaya ayaad elektaroonig ahaan u diri kartaa lacag, ama ha ahaado biil aad ku dhiibeyso internetka ama adoo isticmaalaya kaarkaga. Hadaad u baahan tahay lacag kaash ah, waxaad kala soo bixi kartaa daaqada elektarooniga ah ee mid ka mid ah xafiisyada bangigraaga ama ATM.

Markaad dooraneyso akoonka aad furaneyso, waa in aad si taxadar leh u aqrisaa kontaraktiga bangiga. Waxaay aad ugu kala duwan yihiin akoonnada lacagta la bixiyo. Arintan xataa waxay quseysa hal bangi ayaa waxuu leeyahay akoono kala duwan, ama akoonkan oo kale oo bangiyo kala duwan leh. Waa kuwan dhowr suaalood oo kala duwan oo quseysa qarashka laga dhiibo akoonka, suaalahan waxay kaa caawinayaan akoonkada aad u baahan tahay.

- Ma waxaa jira qarash bil walba si joogto ah oo la bixinaayo akoonka?
- Ma waxaa jira lacag ilaa ugu yaran loo baahan yahay in aan ku shubo akoonka si aan u bixin qarash?
- Ma waxaa jira qarash aan dhiibayo mar walbo oo aan qoro jeeg?
- Ma waxaa jira qarash aan bixinaayo hadaan biilkeyga aan elektaroonig ahaan u bixiyo, ha noqoto bil ahaan ama mar walbo oo aan bixiyo biil?
- Ma waxaa jira qarash aan bixinaayo hadaan lacag kash ah la baxo ama aan ka fiiriyo halaha igi jiro akoonka ATM-ka?
- Ma waxaa jira qarash aan bixinaayo hadaan isticmaalo ATM uu bagi kale leeyahay?
- Ma waxaa jira qarash aan bixinaayo hadaan kaarkeyga wax ku gato?
- Ma jiraa ceymiska deynta?

Waxay ila tahay qarashka ugu weyn oo la bixinaayo in uu yahay hadii aad isticmaasho bangiga ama aad kala baxdo lacag aan kugu jirin – ha noqoto mid aad ku isticmaashey jeeg ahaan, kala baxdey, internetka ama si kaleba. Arintaas waxaa loo yaqaan in aad deen qadatey (overdraft) ama lacag kugu filan oo aan kugu jirin (NSF). Si aad uga hor tagto in aadan dhiibin qarashka NSF-ka, waxaa fiican in aad qadato ceymiska deynta ee akoonkaga.

AKOONKA KEYDKA

Hadaad si joogta lacag ugu keydsato banigaaga waxuu kaa caawinaayo in aad yeelato dhaqaalo aad u weyn oo aad ku gadan karto guri ama aad yeelato lacag kugu filan oo aad isticmaali kato markaad duqoowdo. Laakiin keyda xataa waxuu kaa caawinayaa waxyaalaha lama filaanka ah oo kugu dhaca sida: Sameysaka baabuurka ama qalab weyn oo aad iska badasho ama waxyaalaha lama filaanka ah. Sababtaas darteed waxaad u baahan tahay in aad wax ku keydsato meel amni leh oo aadna markiiba ka heli karto, sida meelaha keydka ama suuqa keydka, si aad uga heli karto si dhaqsi leh.

Keyda caadiga ah



Bangi akoonka keyda waxuu dhaqan u leeyahay mid ka mid ah tan ugu fudud oo wax lagu keydsado. Akoonnada noocan ah waxay leeyihiin tan ugu yar lacag oo la dhigan karo, oo lagaaga baahan yahay iyo sharciga la bixida oo aan sidaa u sii adkeyn, laakiin waxay bixiyaan lacagta ribada ah ee ugu yar oo akoonnada keydadka kale ka duwan.

Ribada wada socota

Badanaa akoonnada keyda waxay bixiyaan lacagta ribada, taas oo macnaheeda tahay halaha kugu jiro mar walba way kuu kordheysaa, waxaana lacagtaa ribada ah laga bixinaya inta mustaqbalka ay kuu sii yaaleyso. Bangiga waxuu kuu sheegayaa lacagta ribada la bixinaayo in laga xisaabinaayo maalin kasta, bil kasta ama waqti cayiman iyo marka lacagtaa ribada ah laguugu daraayo keydkaaga. Markasta oo lagu siiyo lacagtaa waxuu kordhinayaa si dhaqso leh inta kugu jirto, laakiin kordhintaan mid aad u darn ma aha.